



**JUMHUURIYADDA FEDERAALKA
SOOMAALIYA**

GOLAHA SHACABKA SOOMAALIYA

QARAAR KU SAABSAN

**DHISIDDA GUDDIGA KORJOOGTAYNTA
GURMADKA ABAARAHA**

Muqdisho, 18^{ka} Maarso 2017

Tix: GSH/B-10/008/17
Kalfadhiga: 1-aad
Kulankiiska: 3-aad

Taariikh: 18^{ka} Maarso 2017

GUDDOOMIYAHA GOLAHA SHACABKA SOOMAALIYA

Markuu Arkay: Qaraarka GSH/B-10/007/17 ee 18^{ka} Maarso 2017 oo ku saabsan Gurmada Degdegga ah ee Abaaraha;

Markuu dhegeystay: Talada Xildhibaanada Golaha Shacabka Soomaaliya;

Markuu la tashaday: Guddoomiye Ku-xigeennada Golaha Shacabka.

WUXUU GUDDOOMIYEY QODOBBADA SOO SOCDA

Qodobka 1-aad:

Laga bilaabo 18^{ka} Maarso 2017 waxaa la magacaabay Guddiga Korjoogtaynta Gurmada Abaaraha oo ka kooban Xildhibaanada Golaha Shacabka magacyadooda halkan hoose ku xusan:

1. Xil. Amina Xasan Cali
2. Xil. Axmed Maxamed Jaamac "Ciro"
3. Xil. Axmed Xaaji Maxamed "Taaw"
4. Xil. Cabdi Cali Xasan
5. Xil. Dahabo Suusow Maxamed
6. Xil. Duniyo Maxamed Cali
7. Xil. Khalid Macow Cabduqaadir
8. Xil. Maxamuud Cabdiraxamaan Beenebeene
9. Xil. Ubax Tahlil Warsame
10. Xil. Xaawa Yusuf Axmed

Qodobka 2-aad:

Guddiga xilkiisu waa korjoogtaynta iyo kormeeridda howlaha gurmada iyo gargaarka ay fulinayaa Xukuumadda Federaalka, Guddiga Gurmada Abaaraha iyo Hay'adaha Samafalka heer Qaran iyo kuwa caalamiga ka howlgala dalka.

Qodobka 3-aad:

Si waafaqsan Qodobka 65-aad Faqradda 5-aad ee Xeer Hoosaaka Golaha Shacabka xilhaynta guddigan wuxuu ku eg yahay marka howlaha gurmada dhamaadaan xilalkiisuna lagu wareejiyo guddi ka mid ah Guddiyada Joogtada ee Golaha Shacabka.

Qodobka 4-aad:

Qaraarkan wuxuu hirgalayaa markii uu saxiixo Guddoomiyaha Golaha Shacabka Soomaaliya

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka Soomaaliya

